Horumarka Ilmahaaga

Heerarka barashada ee sanad dugsiyeedka 2017-18

Washington waxay leedahay heerar barasho oo fasalka barbaarinta ilaa fasalka 12aad (K—12) kuwaasi oo qeexaya aqoonta iyo xirfadda arday kastaa u baahan yahay si uu ugu diyaargaroobo shaqada, kuuliyadda, iyo nolosha marka uu dhammaysto dugsiga sare.

Hoos waxa ku qoran tusaalayaal kooban oo kusaabsan ahdaafta barashada muhiimka ah ee Washington ee barbaarinta.
Macluumaad dheeraad ah, booqo:

www.YourChildsProgress.com

- **Fanka.** Ka war qabka inta uu gaadhi karo; dayaanada muusiga iyo habraaca; kobcinta xirfadaha codka; kobcinta xirfadaha dhaqdhaqaaqa yar.
- **Tiknoolajiyadda Waxbarasho.** Ururinta macluumaad kusaabsan xayawaanka marka fasalku isticmaalayo websaytyada.
- **Fanka Luuqadda Ingiriisida (ELA).** Fahmida muuqaalada aasaaska ah ee daabacaad, dib uga sheekaynta sheekooyin uu yaqaan iyo tafaasiisha muhiimka ah, iyo ka jawaabista su'aalaha.
- **Waxbarashada Caafimaadka iyo Jimicsiga.** Barashada eray bixinta, xaqiiqooyinka, aragtiyaha kusaabsan jidhka; kobcinta xirfadaha dhaqdhaqaaqa iyo nidaamyada soo-socodka; raacista xeerarka ammaanka.
- **Xisaabta.** Barashada tirooyinka iyo waxa tirooyinku u taagan yihiin, iyo aragtiyaha isku-gaynta iyo kala-goynta.
- **Sayniska.** Wax-ka-barashada adduunka muuqda, cimilada deegaanka iyo waxa dhirta iyo xayawaanku u baahan yihiin si ay u noolaadaan.
- **Cilmiga Bulshada.** U baadhista fasalka bulsho ahaan iyo sahaminta sida go'aannada loo qaato marka la eego xuquuqda, xeerarka, iyo caddaaladda.

Washington sidoo kale waxay leedahay heerar barasho **qaabdhismeedyada iyo heerar qaybeedka Bey'adda iyo Waaritaanka la Isdhexgaliyey, Luuqadaha Adduunka, Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada** (oo loogu talogalay dugsiga dhexe iyo dugsiga sare), **Fasiixnimada Luuqadda Ingiriisida** (ee ELA, xisaabta iyo sayniska), iyo sidoo kale tilmaamaha **Barashada Hore** (dhalashada—fasalka 3aad) kuwaasi oo kaaba waxbarasho si buuxda loo diyaariyey oo loogu talogalay ardayda oo dhan.

Waxbarashada gaarka ah: Ardayda hesha adeegyadu waxay helaan waafajino, qaab-geddisyo, iyo taageerooyinka lagu sheego qorshayaashooda waxbarashada shakhsi ahaaneed.

Bartayaasha luuqadda Ingiriisida: Ardayda barata ku-hadalka Ingiriisida waxay leeyihiin heerarka fasiixnimada luuqadda oo ka caawiya macallimiinta inay qorsheeyaan waxbarista maaddooyinka oo dhan kuwaasi oo ku habboon heerka luuqadda arday kasta.

Sebteembar 2017, Lambarka Soosaarista 17-0022

FASALKA Barbaarinta

Ahdaafta Barashada Gobolka Washington

Sharci-dejinta Gobolka Washington waxay aasaaseen afar hadaf oo barasho si loo taago aasaaska koboca dhammaan heerarka barashada tacliimeed ee gobolka:

1. U akhriska si faham leh, u qoris si wax-ku-ool ah, oo u gudbinta si meelmar ah adoo adeegsanaya qaabab kala duwan kuna sugan meelo kala duwan una jeeda dad kala duwan;
2. Barashada iyo dabbaqidda aragtida iyo mabaa'diida muhiimka ah ee xisaabta; bulshada, duleed, iyo nololeed cilmiyeedka; waddaniyadda iyo taariikhda, oo ay kujiraan dhaqamada kala duwan iyo kaqaybqaadashada matalaada dowladda; juqraafiga; fanka; iyo caafimaadka iyo dhisnaanta;
3. U fekerida qaab falanqayneed, caqligal ah, oo halabuur leh, iyo isdhexgalinta qorista iyo ku-fiicnaanta farsamada iyo sidoo kale waayo-aragnimada iyo aqoonta kala duwan si loo qaabeeyo go'aano macquul ah loona xalliyo dhibaatooyinka; iyo
4. Fahmida ahmiyadda shaqada iyo maalgalinta iyo sida hawlqabadka, dadaalka, iyo go'aannadu si toos ah ugu saameeyaan fursadaha shaqo iyo waxbarasho ee mustaqbalka.

Xafiiska Kormeeraha Waxbarashada Dadweynaha
(Office of Superintendent of Public Instruction)
www.k12.wa.us

WaKIDS

Washington Kindergarten Inventory of Developing Skills

Qiimaynta Barbaarinta Washington ee Xirfadaha Koraya (WaKIDS) waa hab loogu talogalay:

- **Ku soodhawaynta ardayda iyo qoysaskooda barbaarinta iyadoo loo marayo Xidhiidhka Qoyska.** Kahor inta dugsigu bilaabmin, isla marka uu bilaabmo, macallimiinta barbaarintu waxay la kulmaan qoysaska si ay ugu soo dhaweeyaan dugsiga oo ugala hadlaan waxyaalaha ilmo kastaa ku fiican una baahan yahay.
- **Wax-ka-barashada waxyaalaha ardaydu ku fiican tahay iyadoo loo marayo Qiimaynta Ilmaha Dhan.** Marka la gaadho Oktoobar 31, macallimiintu waxay eegi ardayda inta hawlaha xiisadda lagu jiro waxayna diiwaangelin xirfadaha kobcaya ee lix meelood: bulsho-niyadeed, jidheed, garasho, luqadeed, qoris/akhris, iyo xisaabeed.
- **Ka wada-hadalka sifooyinka koboca carruurta iyo ku barashada Iskaashiga Barashada Hore.** Inta sanad dugsiyeedku socdo, xirfadlayaasha barashada xilliga hore iyo macallimiinta barbaarinta ayaa kulma si ay u wadaagaan macluumaadka awood u siin doona ardayda inay guulaystaan dugsiga.

Ayaa kaqaybqaata?

Barbaarinta maalinta-dhan ee gobolka maalgaliyo waxa laga rabaa inay fuliyaan WaKIDS. Inkastoo dugsiyada kale ee dadwaynuhu ay ku tabaruci karaan inay qaybqaataan WaKIDS, dugsiyada oo dhan wali ma aha qaar fulinaya WaKIDS. Marka la gaadho 2017-18, waxaanu saadaalinaynaa dhammaan barbaarintu inay noqdaan fasalo maalin-buuxda oo gobolku maalgaliyo kana qaybqaadanaya WaKIDS.

Siday wax u taraysaa?

Sanad kasta, 80,000 carruur ah ayaa gala barbaarinta kuwaasi oo xirfado aad u kala duwan. Ujeedada WaKIDS waa in la siiyo qoysaska, xirfadlayaasha barashada hore iyo macallimiinta barbaarinta hab caadi ah oo ay ku ururiyaan kuna wadaagaan macluumaadka, si carruurtu u helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan dugsiga.

Macallimiinta barbaarintu waxay isticmaalaan macluumaadka ay soo ururiyaan si ay u horumariyaan barista fasalka oo u waafajiyaana waxbaristooda baahiyaha gaarka ah ee ilmo kasta. WaKIDS sidoo kale waxay caawiyaan go'aaminta qaabab wax-ku-ool ah oo looga qaybgaliyo qoysaska iyo adeeg-bixiyayaasha barashada hore, iyo wargelinta go'aannada siyaasadeed ee heerka bulshada, degmada, iyo gobolka.

Ma waafaqsan tahay heerarka barashada gobolka?

Heerarka Barashada Gobolka Washington waxay u taagan yihiin aqoonta iyo xirfadaha ardayda oo dhan ay tahay inay ogaadaan ayna awoodaan inay sameeyaan *dhammaadka* fasal kasta. Ardayda barbaarinta ee imanaysa lagama filo inay buuxiyaan heerarka dhammaadka sanadka marka ay dugsiga *soo* galayaan. WaKIDS waa hab loo caawiyo kala-guur dhib yar fasalka barbaarinta ilaa 12aad. Waxa loogu talogalay inay ka caawiyaan macallimiinta naqshadaynta barasho ardayda ku rida dhabbaha saxda ah ee buuxinta heerarka barashada dhammaadka sanadka.

Miyey shuruudaha galista barbaarintu isbeddeli?

Maya. Dhammaan carruurta 5 jirka ah marka la gaadho Agoosto 31 waxay gali karaan barbaarinta. WaKIDS ma aha hab lagu go'aamiyo haddii ay tahay ilmuhu inuu galo barbaarinta.

Jadwalka Imtixaanista Gobolka ee Barbaarinta

WaKIDS	
Bilawga sanadka dugsiyeedka:	Qoysaska iyo macallimiinta ayaa kulma xidhiidhka qoyska.
Marka la gaadho Oktoobar 30:	Macallimiinta ayaa dhammaystira qiimaynta ilmaha-idil waxayna u isticmaalaan xogta inay ku kala saaraan barashada carruurta.
Noofambar iyo kadib:	Qoysaska iyo macallimiintu waxay ka wada-hadlaan xogururinta macallimiinta. Macallimiinta iyo adeeg-bixiyayaasha barashada hore ayaa xidhiidha si ay u wadaagaan macluumaadka.
ELPA21	
Ardayda barata luuqadda Ingiriisida ee barbaarinta ilaa 12aad waxay gali doonaan Qiimaynta Fasiixnimada Luuqadda Ingiriisida ee Qarniga 21aad (**ELPA21**).	
ELPA21 waxa la qaadaa sanadkiiba mar guga si loo go'aamiyo ardayda mutaystay inay sii wataan barashada adeegyada taageerada luuqadda Ingiriisida.	
Febraayo 1– Maarso 30:	Arday kasta oo barta luuqadda Ingiriisida oo dhigta barbaarinta ilaa 12aad wuxuu gala imtixaanka onleenka ah.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

www.YourChildsProgress.com

Sebteembar 2017, Lambarka Soosaarista 17-0022